

Waaxda Kahortaga Dabka Seattle

220 3rd Avenue South

Seattle, WA 98104-2608 Iimayl: permits@seattle.gov



Sida Loo adeegsado Teendhooyinka iyo Agabka Kululeeyaasha Inta lagu jiro Aafada Cudurka, ayna Ku jiraan Dokhyada Ogolaanshaha Bilaashka ah ood Ka helayso Waaxda Dabka ee Seattle.

Teendhooyinku waa khatar haddii dab qabsado ama ay soo dumaan. Sababtaan awgeed, teendhooyinka waawayn waxaa ruqsad looga qaataa Xeerarka Dabka iyo Dhismaha. Kululeeyaasha ayaa sidoo kale khatar keeni kara, haddii ay dabka ka helayaan propane/Gaaska Batroolka Dareeraha ah-Liquefied Petroleum Gas (LPG), naafto, ama koronto. Dukumiintigaan waxaa ku qoran xogta kooban ee shuruudaha xeerka iyo sidoo kale xeerarka iyo ogolaanshaha gaarka ah ee u dagan mudada lagu jiro aafada COVID.

TEENDHOYINKA

Waaxda Dabka ee Seattle-Seattle Fire Department (SFD) ayaa soo saaraysa ruqsada ku meel gaar ah ee teendhada (xeerka ruqsada ee nambarkiisu tahay 3201-CV) oo la siinaayo ganacsiyada iyo ururada usoo bixinaaya goobaha adeegooda banaanka. Tusaale caadi ah ayaa noqon kara miisaska cuntada banaanka iyo fasalada banaanka lagu dhigto. Waxaadaad u qalantaa ruqsada ku meel gaarka ah haddii aad banaanka ku bixinayso adeegyada ama ganacsigaaga sabab la xariirta xadiyada caafimaadka dadwaynaha ee lagu xiray adeegsiga gudaha dhismayaasha.

Waxaad u baahan tahay ruqsada Waaxda Dabka ee Seattle-Seattle Fire Department (SFD) si aad u adeegsato teendho ku meel gaar ah, dalad wayn, ama saqaf hawadu soo galayso haddii:

- Teendhadu ka wayn tahay 400 iskuweer fiid ayna leedahay hal darbi ama ka badan; AMA,
- Teendhadu ka wayn tahay 700 oo iskuweer fiid aysana lahayn wax darbi ah (daladaha waawayn ee saqafka bas ah).
- Aad haysato hal teendho oo yar oo saqaf kaliya ah ama ka badan kuwaas oo isfeer yaala bad iskaga dhaw 12 fiid badka guud ee ay ku fadhiyaana uu ka wayn yahay 700 oo iskuweer fiid.

Ruqsada lacag la'aanta ah waxaa ku jira shruudo ay qasab tahay inaad raacdo kuwaas oo la xariira agabka teendhada iyo ku rakibida daladaha waawayn ayadoo la raacaayo shuruudaha badqabka ee ku qoran xeerka dabka. Ruqsadu waxay shaqayn doontaa 90 maalmood. Haddii teendhadaada lasi isticmaali doono wax ka badan 90 maalmood, kadib markaad hesho ruqsadaada ku meel gaar ah ee bilaashka ah ee SFD ee teendhada, waxaad la xariiri kartaa Waaxda Dhismaha iyo Kor Joogtaynta u qaabilsan Seattle ood ka wacayso 206-684-8850 si aad u hesho ruqsad dheeraad ah ama dib u eegis maamul si aad u hesho xaqiijinta inaad ku dhaqantay xeerka. Talaabadaan waa mid ikhtiyaari ah inta lagu jiro mudada shaqooyinka xaalada degdega ah ee ka jira Seattle. Saqafyada lagu xiriiriyo banaanka dhismaha ayaa sidoo kale u baahan ruqsad aad ka hesho SDCI mana maamusho waaxda SFD.

Xataa kadib marka ruqsada ku meel gaarka ah ee SFD ay dhacdo (90 maalmood) waxaa wali lagaa doonayaa inaad raacdo shuruudaha ku dhaqanka xeerka dabka haddii aad sii wadato isticmaalka teendhada.

Haddii aad teendhada ka kiraysanayso shirkad teendho bixiso, fadlan u sheeg shirkada haddii aad u qalanto ruqsada bilaashka ah oo hubi lacagta qarash bixinta si aad u hubiso inaysan kaa qaadayn wax qarash ah oo ay ku sheegayaa ruqsada SFD. Shuruudaha u-qalmitaanka: Waxaad qaar kamid ah ganacsigaaga ama adeegga u bixinaysaa banaanka sabab la xariirta xadidaadaha caafimaadka dadwaynaha ee la saaray adeegsiga gudaha dhismayaasha. Haddii horay lagu siiyay ruqsada ku meel gaarka ah teendhada ama LPG aadna u qalanto ruqsada bilaashka ah, waxaan kuusoo celin doonaa lacagtaada oo buuxda, fadlan nagalaso xariir permits@seattle.gov.

Xaqiji in Teendhadaada ay Aqbalaad ka Haysato Waax dab damiska Haddii aad iibsantay teendho ka wayn 400 oo iskuweer fiid, fadlan xaqiiji inay buuxinayso heerarka ka hortaga dabka ee xeerka dabka (arag shardiga 8 ee ruqsada oo ku qoran bogga ugu dambeeya). Waxaa lagaa doonayaa inaad aqbasho masuuliyada iyo eeda rakibaada saxda ah ee teendhada si wafaqsan heerarka ganacsiga iyo/ama tilmaamaha rakibaada teendhada ee shirkada soo saartay qortay.

Ruqsadaha SFD ee ku meel Gaarka ah ee Teendhooyinka iyo Kululeeyaasha Banaanka La dhigo – Xogta Ruqsadaynta iyo SHardi Dhaafyada la baxshay inta lagu jiro Aafada Caabuqa

Teendhooyinka ku meel gaarka ah waa inaan lagu jirin muddooyinka ay dhacayaan barafka ama baraf kuu dhacaayo ilaa in loo sameeyay maahane inay awood u yeelato qaadista culayska sida ku cad Xeerka Dhismaha ee Seattle. Teendhooyinka yaryar waa in meesha laga furo marka baraf dhacaayo iyo xiliyada dabayluhu jiraan. Teendhooyinka laga kiraystay shirkad caan oo teendhooyinka kiraysa ayaa buuxin doono heerarka xeerka dabka shirkada teendhada ayaana qaadanaysa masuuliyada rakibaada saxda ah ee teendhada.

Ma tahay Inaan Doorto Teendho aan Darbi Lahayn? Sababo dhanka hawada ah awgood, Gudoomiyaha wuxuu leeyahay shuruudo kala duwan oo ku xiran haddii teendhadaadu aysan lahayn wax derbi ah, ay leedahay hal, labo ama ka badan oo derbi ah. Fadlan si taxaddar leh u fiiri:

<https://www.governor.wa.gov/sites/default/files/COVID19%20Outdoor%20Open%20Air%20Seating%20Guidance.pdf>.

Dhanka kale, sidoo kale waxaa jira saamayn xeerka dabka ah oo ku saabsan xulashada teendho derbi leh ama mid aan lahayn: Haddii aan teendhadaadu lahayn wax darbiyo ah, waxaad kaliya u baahan tahay ogolaanshaha SFD haddii teendhadaadu ka balaaran tahay 700 iskuwee fiid, ama aad teendhooyin badan isfeer dhigto ayagoo iskaga dhaw 12 fiid kuna fadhiya balac guud oo ka badan 700 oo iskuweer fiid. Hase yeeshee, haddii aad darbi u yeesho teendhada, markaas teendhooyinka yaryar ayaa u baahan doona ruqsada SFD, sidoo kale. Haddii teendhadaadu leedahay wax darbi ah, ruqsad ayaa laga doonayaa teendhooyinka badkoodu yahay 400 oo iskuweer fiid ama ka badan.

Ilaa bad intee u dhaw Dhismaha ayaa Teendhada Lagu Rakibi Karaa? Tusaale, Teendhooyinka daboolaaaya Miisaska Cuntada ee Geeska wadiiqada SFD waxay caadiyan doonaysaa inuu boos u dhaxeeyo dhismaha iyo teendhooyinka kaasoo dhan 10 fiid, ayadoo ujeedada ugu wayn tahay in wado loo furo gaadiidka gurmada caafimaadka degdega ah. Hase yeeshee, inta lagu jiro xaalada degdega ah ee COVID, SFD waxay soo saari doontaa ruqsad ogolaanaysa in teendhooyinka iyo dhismaha aan bad u dhaxayn.

Waa maxay Shuruudaha Buuxa ee Ruqsada Ku meel Gaarka ah ee Teendhada? Fadlan arag bogga ugu danbeeya.

DABKA IYO NALKA BANAANKA DHISMAHA

Propane (LPG) iyo Kuleeliyaasha Naaftada Ku shaqeeya ayaa u baahan Ruqsad iyo Taangida Shidaalkana looma ogola in Teendhada Gudaheeda La dhigo. Tani waxay ka dhigan tahay kululeeyaasha "dalada u eg" ayaa la ogol yahay inay 10 fiid u jiraan teendhada, laakiin looma ogola gudaha teendhooyinka. Kululeeyaasha u eg "Salamander" kuwaas oo gufaacada kulul kusii daaya hoosta teendhada ayagoo banaanka yaala ayaa la ogol yahay waxaana badanaa laga helaa shirkada teendhada kireeya. Taangiga shidaalku waa inuu ugu yaraan 10 fiid u jiraa teendhada iyo iridka laga baxo waana qasab inaad haysato dab damiyaasha 3A 40BC.

Haddii aad kiraysato kululeeye ku shaqeeya LPG/Propane ama naafto aad kasoo qaadato shirkada kiraysa teendhada, shirkadaas ayaa caadiyan lahaan doona ruqsada kululeeyaasha ku shaqeeya propane/naaftada ee SFD, lagaamana doonaayo inaad ruqsad dheeraad ah soo qaadato. Waa inay sidoo kale baxshaan agabka dab damiska ee sharcigu amraayo. Haddii aad iibsanaayo kululeeyaasha LPG/propane ta ama naaftada ku shaqeeya, waxaad u baahan ogolaanshaha SFD.

SFD ayaa soo saaraysa ruqsadaha ku meel gaarka ah ee bilaash aka ee kululeeyaasha ku shaqeeya Propane/LPG (xeerka ruqsada 8207-CV) iyo ruqsadaha naaftada (xeerka ruqsada 1102-CV) oo la siinaayo ganacsiyada iyo ururada adeegyadooda usoo bixinaaya banaanka dhismaha sabab la xariirta xadidaadaha caafimaadka dadwaynaha ee la saaray ganacsiyada gudaha dhismaha. Tusaale caadi ah ayaa noqon kara miisaska cuntada banaanka iyo fasalada banaanka lagu dhigto. Ruqsada bilaashka ah waa ku jira shuruudaha ay qasabka tahay inaad raacdo oo quseeya badqabka goobta, kaydinta, iyo adeegsiga maadooyinka propane ama naaftada. Ruqsadu waxay shaqaynaysaa ilaa Oktoobar 2021 ama ilaa magaaladu soo afjarto hawlaha xaaladaha degdega ah ee COVID, hadba kii soo hormara. Haddii aad codsanayso ruqsada kululeeyaha oon xariir la lahayn teendho, waxaa sidoo kale lagaa codsan doonaa shaxda ama sawirka goobta aad doonayso oo muujinaaya marinada, saqafyada, iyo miisaska aad doonayso in kululeeyaha la dhigo. Haddii horay lagu siiyay ruqsada ku meel gaarka ah ee teendhada, kululeeyaha ku shaqeeya propane/LPG ama naaftada aadna u

Ruqsadaha SFD ee ku meel Gaarka ah ee Teendhooyinka iyo Kululeeyaasha Banaanka La dhigo – Xogta Ruqsadaynta iyo SHardi Dhaafyada la baxshay inta lagu jiro Aafada Caabuqa

qalanto ruqsada lacag la'aanta ah waxaan kuusoo celin doonaa lacagtaada si buuxda, fadlan nagalaso xariir permits@seattle.gov.

Kululeeyaasha ku shaqeya Korontada iyo Nalalka ayaa loo ogol yahay banaanka iyo sidoo kale gudaha teendhada uma baahna ruqsad gaar ah oo laga qaato SFD. Hase yeeshee waxaa jiro digniino ay qasab tahay inaad raacdo markaad adeegsanayso fiilooyinka korontada. Fiilooyinka korontada waa in laga ilaaliyaa jeexmid iyo waxyeelo lagana fogaado khatar ah in lagu kufi karo. Haddii aad isticmaalayso fiilada korontada oo ku xariisan kululeeyahaaga, sabab la xariirta cadadka tamarta kululeeyuhu isticmaalo, waa qasab inaad hubiso in fiiladu tahay ugu yaraan 12 giig (ama kasii wayn haddii shirkada soo saartay ku talinayso). Waa inaaney isku xidhnaan iyagu waa inaan lagu xidhin tilmaamaha joogtada ama dhaafida daloolada gidaarada. Barees kasta oo koronto oo wayn waa inuu daboolnaadaa. Tani waxey qabanaysaa sanduuqyada kala goosyada, danab qaybiyaasha, iyo nooc kasta ee sanduuqa bareeska ah.

Wixii xog dheeraad ah, fadlan la xariir Waaxda Ruqsadaha ee SFD od ka helayso permits@seattle.gov. Adeegyada turjumaanka ayaa la heli karaa. Fadlan waxaad wicitaan ka codsan kartaa qof ku hadla luuqadaada – kaliya noo sheeg luuqada aad ku hadasho iyo nambarkaaga taleefanka.

Fadlan arag bogga soo socda si aad u akhrido shuruudaha buuxa ee ruqsada SFD ku bixiso teendhooyinka ku meel gaarka ah.

Ruqdasaha SFD ee ku meel Gaarka ah ee Teendhooyinka iyo Kululeeyaasha Banaanka La dhigo – Xogta Ruqsadaynta iyo SHardi Dhaafyada la baxshay inta lagu jiro Aafada Caabuqa

SHURUUDAHA RUQSADA: RUQSADAHA SFD EE TEENDHADA KU MEEL GAARKA AH

Ogoow: Shuruudahaan waa kuwo quseeya ruqsadaha teendhada ku meel gaarka ah ee la baxsho inta lagu jiro hawlaha degdega ah ee COVID wayna isbadali karaan marka hawlaha degdega ah ee COVID dhammaadaan.

1. Tirada ugu yar iyo balaca ilinka laga baxaayo/albaabada waa in lagu qoraa shaxda hoose. Badka socdaalka ee ugu badan ee lagu tagaayo ilinku waa inuu ahaato 100 fiid, marka qofku kasoo baxaayo teendhada. ('15 SFC Qaybta 3103.12)

Xajmiga Dadka ku jira Teendhada	Tirada ugu yar ee albaabada	Balaca ugu yar ee albaab kasta
10 ilaa 199	2	72
200 ilaa 499	3	72
500 ilaa 999	4	96
1,000 ilaa 1,999	5	120
2,000 ilaa 2,999	6	120
Ka badan 3,000	7	120

2. Ilin kasta waa in lagu xiraa calaamada "EXIT" oo ifaysa ayadoo xarfuhu ugu yaraan kor u qaadan yihiin 5 inji. ('15 SFC Qaybta 3103.12.6).
3. Waa inaad dhigtaa meesha hal dab damiye oo leh cabirka ugu yaraan 2A inta u dhaxaysa 2,000 iskuweer fiid kasta. Goobta dab damiye kasta waa in lagu calaamadeeyaa astaamo, si wanaagsan loogu jeedo. Badka socdaalka ee ugu badan ee lagu gaarayao dab damiye kasta oo dhex yaala teendhada waa inuu noqdaa 50 fiid. ('15 SFC Section 3104.12)
4. Gaariyaal kasta oo teendhada yaala waa in taangigooda shidaalku faaruq yahay lagana furo fiilooyinka beeytariga. ('15 SFC Qaybta 3104.18)
5. Kusoo dhaji calaamadaha "SIGAARKU WAA MAMNUUC", kuwaas oo si fudud looga jeedo teendhada/dalada, uu fuli xeerka. ('15 SFC Qaybta 3104.6)
6. Dhulku, gudaha iyo banaankaba, waa in laga ilaaliyaa lagana fogeeyaa qashinka dabku qabsan karo. Qashin kasta waa in laga saaraa laguna ridaa meel loo asteeyay. ('15 SFC Qaybaha 3104.21 & 3104.22)
7. Waa inaysan jirin agab keenaaya dab ama bandhigyo lagu dhex saamyn teendhada ayadoo ogolaansho hore laga helin Waaxda Kahortaga Dabka. ('15 SFC Qaybta 3104.7)
8. Daahyada darbida geeska iyo dusha sare ee teendhada waa in laga sameeyaa waxyaabo aan dabku sahal u qabsan. ('15 SFC Qaybta 3104.2)
9. Xaalado kasta oon loo jeedin oo keeni kara khatar dabeed, ama qayb ka qaadanaaya faafida degdega ah ee dabka, ama dib u dhigaaya ama carqaladaynaaya in degdeg looga baxo teendhada, oon ku jirin ruqsadaan, waa in si degdeg ah loo bixiyaa ama loo saxaa. ('15 SFC Qaybta 105.3)
10. Kaliya aaladaha kuleelka ee korontada ku shaqeeya ayaa la ogol yahay in gudaha loo gasho teendhada. Dhammaan aaladaha kale ee kuleelka (tusaale, kuwa ku shaqeeya propane, naafto ama gaas cade) waa inaan lasoo gelin teendhada waxayna u baahan yihiin ruqsad gaar ah oo laga qaato Waaxda Dabka ee Seattle. ('15 SFC Qaybaha 3104.7, 3104.15, 3104.16, 3104.17, 105.3 & 105.6)
11. Kululeeyaasha korontada ku shaqeeya iyo agabka kale ee korontada waa in lagu qoraa ayna ansixisaa UL, FM ama wakaalado kale oo aqoonsi u haysta tijaabinta agabka. ('15 SFC Qaybta 605.7) Fiilooyinka kululeeyaasha korontada ku shaqeeya waa inay yihiin 12 giig (ama kasii wayn haddii shirkada samaysay ay sidaas ku taliso). Fiilooyinka waa inaan "la isku duubin" ama la isku xariirin si ay u noqdaan fiilo dheer.
12. Aaga fiilooyinka waa in si cad loo asteeyo si looga dheeraado inaan dadku ku kufin ('15 SFC Qaybta 105.3)
13. Si ay u shaqayso, ruqsadaan iyo lifaaqyada la socda waa in lagusoo dhajiyaa meel u dhaw meesha dadku fadhiyaan/shaqadu ka socoto ('15 SFC Qaybta 105.3.5)
14. Kuraasta dabacsan, miisaska la duubo ama kuraas kuwaas lamid ah, oo ka badan tirsiga 200, waa in la iskugu geeyaa kooxo sadex ah ama ka badan. ('15 SFC Qaybta 1029.14)

Ruqdasaha SFD ee ku meel Gaarka ah ee Teendhooyinka iyo Kululeeyaasha Banaanka La dhigo – Xogta Ruqsadaynta iyo SHardi Dhaafyada la baxshay inta lagu jiro Aafada Caabuqa

15. Dukumiinti meeshaan loogu yeeraayo “Letter of Structural Stability (LOSS, Waraaqda Sugnaanta Dhismaha)” ayaa la bixin doonaa marka la codsanaayo ruqsadaan (’15 SFC Qaybta 3103.9)
16. Teendhooyinka ku meel gaarka ah waa inaan lagu jiro xiliga barafku dhacaayo ilaa in loo sameeyay maahee inay xajiyaan culaykaas sida ku cad Xeerka Dhismaha ee Seattle. (’15 SFC Qaybta 105.3)

Ogoow: Shuruudahaanwaakuwo quseeya ruqsadaha teendhada ku meel gaarka ah ee la baxsho inta lagu jiro hawlaha degdega ah ee COVID wayna isbadali karaan marka hawlaha degdega ah ee COVID dhammaadaan.